



Naga caawi Abuurista Dugsiga Sare ee Ida B. Wells oo Casri ah

Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiga Sare ee Ida B. Wells iyo Ida B. Wells Cluster,

Hawsha qorsheynta balaaran ee dhaqan gelinta Dugsiga Sare ee Ida B. Wells ee taariikhiga ah ayaa socota. PPS waxay doonaysaa heerarka kaladuwan ee muwaadiniinta xiiseynaaya kuwaasoo door wanaagsan ka qaata hawsha abuurista dugsiga sare ee jiilka soo socda anagoo adeegsanayna Gudiga Qorsheynta Balaaran ee Ida B. Wells (CPC). [Halkaan ka akhri xaashida xogta Gudiga Qorsheynta](#)

[Balaaran ee Ida B. Wells](#) | [Español](#) | [Tiếng Việt](#) | [Русский](#) | [Soomaali](#) | [中文](#)

Shaqada Gudiga Qorsheynta Balaaran ee Ida B. Wells

Yoolka Ida B. Wells CPC waa inay abuuraan qorshe balaaran oo sinaan iyo wadajir leh si loo dhiso Dugsiga Sare ee Ida B. Wells oo casri ah ayadoo la adeegsanaayo fikir uruurinta bulshada ee hufan. Waxaa laga qaybgelin doonaa ardayda, waalidiinta, macalimiinta, hogaanka tacliinta, maamuleyaasha, shaqaalaha PPS, iskaashatada, wakiillada bulshada iyo xubin kamid ah gudiga dugsiga.

Gudiga CPC wuxuu uruuriyaa uuna taxliiliyaa fikradaha bulshada oo dhan wuxuuna kala shaqeeyaa faahfaahinnada mashruuca xubnaha kale ee bulshada Ida B. Wells. *Inkastoo xubnaha CPC aysan masuul ka ahayn gaarista go'aannada kama danbaysta ah, fikradahooda ayaa muhiim u ah abuurista qorshe balaaran oo bulshada oo dhan ku wada qanacsan tahay.*

Ku soo biir Gudiga Qorsheynta Balaaran ee Ida B. Wells (CPC)

Si aad u codsato booqo Webseedka Casriyaynta Ida B. Wells oo ah <https://www.pps.net/IdaBWellsBond> Codsiyada ayaa lagu heli karaa dhammaan luuqadaha ay taageerto PPS. Codsiyada waraaqda ah ayaa sidoo kale laga heli doonaa Dugsiga Sare ee Ida B. Wells iyo marka la codsado. IMusharixiinta xiiseynaaya waa inay qorsheyntaan ka qaybgalka kulanka halmar bishii oo dhacaaya xiliyada fiidkii soconaayana muddo dhan 5 ilaa 6 bilood. Hawsha codsiyada CPC ayaa furnaan doona ilaa bartamaha Sibteembar. Kulanka koobaad ayaa dhici doona dhammaadka Sibteembar.

Fursadaha Kale ee Wada shaqaynta

Haddii aadan awoodin inaad ku biirto CPC, waxaad ka helaysaa fursado aad kusoo gudbin karto codkaaga Kulannada Furan iyo Aqoon Kororsiyada Naqshada ee soo socda. Taariikhaha ayaa lagu soo bandhigi doonaa webseedka.

Jadwalka Casriyaynta Clevelan

Qorshaynta iyo Naqshada ayaa la filayaa in la bilaabo bilowga dayrta 2023 ayadoo lagu bilaabaayo abuurista Qorshaha Balaaran ee Ida B. Wells. Wajiga Qorsheynta iyo Naqshada ayaa socon doona labada sano ee soo socda. Maal gelinta dhismaha Ida B. Wells la casriyeeyay ayaa u baahan inay ka timaado xeerka mustaqbalka ee lacagta damaanada ah.

Ka qaybqaado oo hel xogtii ugu danbaysay

Webseedka casriyaynta Ida B. Wells ayaa xog kaa siinaaya waxyaabihii ugu danbeeyay ee soo kordhay kuna siinaaya liiska fursadaha soo socda ee wada shaqeynta. Waxaad sidoo kale kusoo biiri kartaa liiska boostada ee mashruuca Casriyaynta Ida B. Wells oo aad ka helayso wellsbond@pps.net. Waad ku mahadsan tahay gacanta aad ka gaysatay abuurista Dugsiga Sare ee Ida B. Wells oo Casri ah Qarniga 21^{aad}.